

Ku badqabka Horten

Difaaca dadka waaweyn ee
khatarta ku jira



HORTEN
KOMMUNE

Rabshadaha gurigu waa dhibaatooyin bulsho

Ma la kulantaa rabshad/jidh-dil ama xadgudub, mise waxaad ka shakisan tahay qof 18 ka weyn oo lagu xadgudbo? Waa inaad markaa la xidhiidhaa kooxda degmada ee TryggEst [SafeEst].

Waa maxay TryggEst?

Degmada Horten waa degmo TryggEst. Waxay tan macneheedu tahay in degmadu ay samaysay koox waaxo kala-duwan ah, si ay uga caawiyaan ka hortagga, ogaanshaha iyo la dagaallanka rabshadaha iyo xadgudubyada ka dhanka ah dadka waaweyn ee aan lahayn awood ay isku difaacaan.

Tusaalooyinka dadka sida gaarka ah ugu nugul rabshadaha iyo xadgudubka waxaa ka mid ah dadka leh asaasaq, naafo jidheed iyo mid

maskaxeed, dhibaato mukhaadaraad, dadka waayeelka ah, ama kuwa xanuusanaya.

Kooxda TryggEst ee degmada Horten

Kooxda TryggEst ee degmada Horten waxay ka kooban yihiin wakiillada:

- Adeegga Caafimaadka Dhimirka iyo Qabatinka Maandooriyaha;
- Adeegga Daryeelka Guriga;
- Maamulka Shaqada iyo Daryeelka Norway (NAV);
- Adeegga Shaqaalaha bulsho

Kooxda TryggEst ee degmadu waxay u shaqeeyaan qaab waafaqsan qaabdhismeed dalkan Norway loo xilsaaray Agaasinka Carruurta, Dhallinyarada iyo Arrimaha Qoyska (Bufdir).



Shaqada heer degmo ee Horten waa mid qaab siyaasadeed lagu qaatay oo lagu xardhay Qorshaha Waxqabadka ee degmada ee ka dhanka ah rabshadaha qoyska.

Goorma ayaan la xidhiidhi karaa TryggEst?

Waxa jira noocyo badan oo rabshad iyo xadgudub. Qaarkood waa la arki karaa, halka kuwa kale aan si fiican loo arag, sida xadgudub maskaxeed iyo mid dhaqaale.

haddii aad ka walaacsan tahay in qof lagu xadgudbo, waa inaad la xidhiidhaa kooxda TryggEst si aad ugala xaajooto walaacaaga. Waxaad ahaan kartaa qarsoodi.

Shaqaalaha degmada Horten ayaa sidoo kale la xidhiidhi kara kooxda.


Sidee ayay TryggEst wax u caawin karaan?

Kooxda TryggEst waxay talooyin iyo hagitaan siiyaan shaqaalaha iyo dadka deegaanka, ka sokow qiimaynta iyo fulinta tallaabooyin.

Xidhiidhka

Waxaad kooxda TryggEst ee degmada Horten kala xidhiidhi kartaa: 482 65 307.

Waxa telefoonka la joogaa Isniin, Arbaca iyo Jimce saacadaha 10.00-14.00.



**MACLUUMAADKA XIDHIIDH
KOOXKA TRYGGEST EE DEGMADA HORTEN**
Lambarka Telefoonka: 482 65 307.

Isniin, Arbaca iyo Jimce saacadaha 10.00 - 14.00

ADEEGYADA TAAGEERO EE KALE

Xaaladaha degdega ah ee rabshadaha:
Kala xidhiidh booliiska lambarka 02800

Haddii aad u baahan tahay badbaado degdeg ah, wadahadal, talo/hagitaan:
Kala xidhiidh xarunta Vestfold ee musiibooyinka (Shelter) lambarka 33 35 91 91

haddii aad ka walaaxsan tahay carruur:
Kala xidhiidh Adeegga Daryeelka Carruurta 95 19 35 10
(saacadaha ay furan yihiin 9:00 ilaa 15:00).
Xilliyada ka baxsan saacadahan ay furan yihiin:
Kala xidhiidh kooxda Daryeelka Carruurta ee Degdegga ah 33 31 02 03.